WORCESTER
PUBLIC SCHOOLS

Office of the Superintendent
Dr. Rachel Monárrez
Superintendent

**P** 508-799-3115
**F** 508-799-3199
**E** communications@worcesterschools.net

Dr. John E. Durkin
Administration Building
20 Irving Street
Worcester, MA 01609-2493

Maarso 2023

Maalin wacan, Daryeeleyaasha Worcester Public Schools:

Way adag tahay in la rumaysto laakiin waxaan ku jirnaa bishii lixaad ee sanad Dugsiyeedka 2022-23 waxaana marhore u dabaal degnay maalintii 100aad ee uu dugsigu furnaa. Waxaan aad u rajaynayaan in ilmihiina iyo dhammaan qoyskiinu ay khibrad wanaagsan kala kulmeen dugsiga taasoo ay ka buuxaan fursado lagu kobcinaayo fikirka, lagu baranaayo fikrado cusub, ay ku yeelanayaan saaxiibo cusub, ayna saamayn wanaagsan ku yeelanayaan dadka idin la jooga. Waxaan abaal wayn idiin kaga hayaa inaad isiiseen fursad aan ku hogaansho worcester Worcester Public Schools.

Ujeedada waraaqdaan waa inaan u dabaal degno guulo kaladuwan oo laga gaaray WPS, inaan xog cusub ka bixiyo kormeerkayga dhageysiga iyo waxbarashada, aana idin la wadaago waxa aad filan kartaan iyo sida aan u wada xariirayno wixii hadda ka danbeeya.

**Dabaaldegyada:**

- **<u>Qodobada Kooban ee Nashaadada Ardayda:</u>** Ardaydeena ayaa sii wada inay hormar cajiib ah ka sameeyaan xirfadahooda iyo hibooyinkooda badan ee cajiibka ah. WPS waxaa ka buuxa arday hibo leh, dareen feejigan leh, ciyaar yahanno, farshaxaniisteyaal, saynisyahanno iyo muusigyahanno iyo dadka kale!

  **Kooxda Kubada cagta ee South High iyo Kooxda Iaalacshoowga ee Doherty** ayaa hormar wayn ka gaaray ciyaaraha ayagoo muujiyay xili ciyaareed guul laga gaaray. **Kooxda Dheesha ee Burncoat** tayaa gaaray ciyaaraha heer qaran waxayna kusoo baxeen ilaa simifaynalka qaran, 30 **arday oo ka socda WPS ayaa laga aqbalay bandhiga muusiga Da'yarta kuwaasoo ka socda South, Burncoat, iyo Sullivan**. Intaas waxaa dheer, ardaydeena hibada leh ayaa soo diray 1,000 maqaal oo ay kusoo gudbiyeen tartanka Sanad Guurada 45 ee Bulshada Taariikhda Worcester ee “Be My Valentine”.

Haddii aad marna la yaabtay fahmada ardaydeena, la soco WGBH oo daawo **Dugsiga South High** oo samaynaaya **Bandhiga Su'aalaha Dugsiga sare ee aadka loogu tartamaayo.** (**Sheekada ka daawo oonlaynka!**)

Dugsiyada sare ee **Doherty South High** ayaa si sharaf u malatay WPS waxayna ka qaybgaleen **Tartanka Roobaadyada Dugsiga Sare ee VEX** oo lagu qabtay Dugsiga Bancroft.

Ugu danbayntii, kooxaheena ciyaaraha xiliga qaboobaha: **North boys basketball** iyo **South's girls basketball** ayaa ah labada kooxood ee ugu dhibcaha badan! Haddii ay tahay fasalka, goobta ama garoonka, dedaalka, ama dhisida roobaadyada, ardayda Worcester Public Schools way samayn karaan dhammaan.

- **Hormarada dhanka Badqabka:** Waxaan qandaraas siinay *Guidepost Solutions* si ay u samayso qiimaynta badqabka ee xarumaheena degmada. Waxaan filaynaa inaan helno tallooyin la xariira dhinacyada cabirada amaanka goobaha (qufulada albaabada, kaamirooyinka, nalka banaanka, riddada), habraacyada soo gelida iyo ka bixida dugsiga, tababarka iyo dhoolatuska badqabka ee ardayda iyo shaqaalaha. Waxaa intaas dheer, dhammaan maamuleyaasha dugsiyada, maamuleyaasha heer degmo iyo xubnaha Waaxda Booliiska Worcester ayaa maray tababar hal maalin ah oo ay qabteen *I Love You Guys*. Waxaad filan kartaa inaad wax badan ka ogaato *I Love You Guys* mustaqbalka ayna ku jiraan dookhyada helitaanka aqoon kororsiga daryeelaha.www.Iloveyouguys.org

- **Taageerooyinka Dheeriga ah ee Qoyska iyo Ardayga:** Anagoo kaashanayna Guddiga Dugsiga waxaan awoodnay inaan shaqaalaysiino shaqaale muhiim ah oo taageeraaya ardayda iyo qoysaska. Waxaad filan kartaan inaad aragtaan xariirada heerka sare ah oo aan la samaynayno qoysaska ayna ku jiraan kordhinta ku jirista baraha bulshada iyo noocyada kale ee xariirada ka yimaada dugsiyada iyo xafiiska degmada. Waxaa intaas dheer, waxaan muhiimada siinaynaa inaan kor u qaadno wada shaqaynta qoyska waxaana shaqo gelinay dad naga caawiya hogaaminta shaqadaan muhiimka ah. Ugu danbayntii, waxaan qandaraas kula galnay adeeg bixiyaal maxali ah si ay nooga taageeraan baahiyaha caafimaadka dhimirka ee dhalinteena dugsiyada dhexe iyo sare.

**Mawduucyada Dhagaysiga iyo Waxbarashada:**
Waad ku mahadsan tihiin kuwiinii awooday inay waqti uga raadshaan jadwaladiina mashquulka badan kana soo qaybgalay kulanka dhagaysiga ah dayrtii hadda lasoo dhaafay fikradahana ku dhiibtay xog uruurinta oonlaynka ah.

Mawduucyada soo socda waxay kasoo baxeen fikradihii aad dhiibateen:

1. Xarumo Casri ah oo Amaan ah
2. Cimilada iyo Dhaqanka Dugsiga
3. Xariirka iyo Wada Shaqaynta Joogtada ah

4. Faya dhawrka iyo Caafimaadka Dhimirka
5. Ilaha Loo siman yahay iyo Barnaamijyada Waxbarashada
6. Xulashada iyo Joogtaynta Xirfadleyaasha

**Marka, Maxaa Xiga?**

1. Hormarinta Qorshaha Istaraatiijiga ah ee jiray ayadoo la adeegsanaayo iskudarka mawduucyada lagasoo qaatay kulannada dhagaysiga iyo xogta aan soo uruurshay intii aan fasallada booqanaaayay.
2. Kusoo darista koox saamileeyda qoomiyadaha kaladuwan ah si loo abuuro qorshaha istaraatiijiga ah.
3. Qeexida higsiyada, cabirada iyo qoondooyinka miisaaniyada ee qorshaha istaraatiijiga ah si loola socdo loona xaqiijiyo saamaynta uu ku leeyahay waxbarashada ardayga.
4. Furista Qorshaha Istaraatiijiga ah ee la kobciyay Sibteembar 2024.
5. Dhaqan gelinta tallooyinka isla xisaabtanka badqabka ayna ku jiraan qoondooyinka miisaaniyada, marka loo baahdo.
6. Sii wadista raadinta qaabab lagu joogtaynaayo ku xirnaanta dugsiyada, qoysaska iyo iskaashatada bulshada.

**Sidee ayaad ku helaysaa warbixin iyo xariir?**

- Xaqiiji inaad ku xirnaato bogaga WPS ku leedahay Facebook, Twitter, iyo Instagram si aad ula socota waxa ka socda dugsiyada!
- Si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay ee abuurista Qorshaha Istaraatiijiga ah, booqo worcesterschools.net/planupdates. Halkaan ayaan soo gelin doonaa xogta dhawaan.

Waxaan sii wadaa inaan ku kalsoonaado guusha ay gaari karto Worcester Public Schools. Waxaan nahay koox isdhaarsatay oo halkaan u joogta inay u adeegaan bulshadaan cajiibka Worcester. Anagoo ku kaashanayna, Gudiga Dugsigeena iyo iskaashatada bulshada ma jiro wax aanaan awoodin aanana guul ka gaari doonin. Fadlan sii wad inaad warkeena la socoto, feejignaato, aadna iska indho tirtaan buuqa la furaayo aadna diirada saartaan ujeedada jiritaanka - si aan wax u barno jiilalka mustaqbalka. Halkaan, meel kasta… *si* wadajir ah.

Kii daacada kuu ahaa,

Rachel H. Monárrez

Rachel H. Monárrez, Ph.D.
Kormeeraha Guud ee Dugsiyada